Degmada Columbus
**Waaxda Canshuurta Dakhliga**

# Tilmaamaha Foomka IR-25

## Canshuur Celinta Dakhliga Shaqsiyeed ee Columbus

U isticmaal diyaarinta canshuur celinta
**2018**

**Sicirka Canshuurta Columbus 2.5%**

## Maxaa cusub?

**Columbus waxba uma sii maamuli doonto magaalooyinka kale.** Laga bilaabo bisha Janaayo 1, 2019, magaalada Columbus waxba (canshuur) uma sii maamuli doonto magaalooyinka hoos ku xusan. Fadlan booqo shabakadaha hay'adaha cusub maamulaya galalka dakhli canshuur celinta, si aad xaraysid, bixisid, ama xog dheeraad ah uga heshid taariikhdan kadib.

*Hay'ad Goboleedka Dakhli canshuurt celinta (RITA)*
- Brice
- Canal Winchester
- Groveport
- Harrisburg

*Hay'adda Dhexe ee Ururinta (CCA)*
- Marble Cliff
- Obetz
- Prairie-Obetz JEDZ

Fadlan ogoow: Magaalada Columbus waxay weli sii maamuli doontaa dakhli canshuur celinta North Pickaway County iyo Prairie Township Iskaashigooda Degmo ee dhaqaale kobcin (JEDDs).

**Kharashaadka 2106 ma ahaan doono mid canshuur celin jaran doonto.** Qaanuunka jaridda canshuurta iyo Shaqooyinka ee 2018 wuxuu baabi'iyey jaridda kaydinta ee shaqaalaha loogu celiyo kharashka ay galaan awgeed. Sidaa awgeed, laga bilaabo sanad canshuureedka 2018, kharashaad-yadani oo caadiyan lagu sheegto foomka 2106 ma sii ahaan doonaan kuwa laga jarto soo celinta dakhliga canshuurta ee Degmada.

**Sheegashada kharashka ka dhumay hawl socotay waa la oggolayahay.** Laga bilaabo sanad canshuureedka 2018, sheegashada kharashka ku dhumay hawl socotay waa la oggolyahay, hase ahaatee waa xaddidantahay sida uu qabo xeerka ORC 718.01. "Dhuminta Kharash Hawl-galeed" macnaheedu waa dhumin dakhli oo ku dhacday qof ka hawlgalay beec-mushtar ama ganacsi. "Dhumin kharash hawlgal" kuma jirto kharash dhumay oo aan la isticmaalin oo ay keentay ammuuro xaddidan, arrin halis ku jirto oo xaddidaad keenta, xirfado aan fir-fir-coonayn wax ku dhumay oo xaddidan. Kharashka ku dhuma xirfado aan firfircoonayn waxaa sanadkii lagu sheegan karaa ujeeddooyinka canshuureed ee dowladda dhexe.

## Waxaa lagu xarayn karaa mareegta (shabakadda) Internetka

Dhammaan foomamka iyo tilmaamaha waxaa laga heli karaa shabakadda www.columbustax.net. Foomka IR-25 waxaa laga soo buuxin karaa shabakadda iyadoo la isticmaalayo Nadaamka Si Sahlan u Diiwaangelinta (Easy File system). Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan buuxinta mid kamid ah foomamkeena iyo/ama u baahantahay foomamka canshuurta, fadlan soo wac (614) 645-7370.

## Sidee loo go'aamiyaa canshuuraha dowladda hoose?

Canshuurta dowladda hoose waxaa marka hore la siiyaa degmada meesha shaqada lagu qabtay oo dakhligana laga kasbaday. Canshuur bixiyaasha waxaa laga yaabaa inay sidoo kale leeyihiin mas'uuliyado canshuureed oo dheeraad ah oo ku aaddan degmada ay degganyihiin taasoo ku xiran inta degmada gurigu oggoshahay marka la eego canshuurta lagu bixiyo meeshaad ka shaqayso ama dakhliga kaa soo galo.

Haddii aad ka shaqayso ama deggantahay Magaalada Columbus, waxaad mas'uul ka tahay canshuur celinta dakhliga.

## Miyaaan u baahnahay inaan xareeyo?

Waxaad kaliya u baahantahay inaad xarayso haddii mid kuwan kamid ah ku khuseeyaan:

1. Waxaad xaraysay oo aad bixisay canshuurtii sanadkii hore. Soo celin kama danbays ayaa loo baahanyahay si loo xiro koonto canshuureed haddii mar danbe aan lagaaga baahanayn inaad xarayso canshuur.

2. Waxaad dakhli ku heshay Columbus dhexdeeda taasoo canshuurta degmada lagaa jarin ama si buuxda iyo/ama sax aan lagaaga goynin. (Ku dhufo nambarka ugu weyn mushaarka ee ka muuqda canshuurta foomkaaga W-2 sanduuqa 5 ama 18 sicirka ah 2.5%. Haddii lacagta lagaa gooyey ay sax tahay, natiijada waa inay la ekaataa tan lagaa gooyeye ee ka muuqata sanduuqa 19 ee foomkaaga W-2).

3. Waxaad deggantahay Columbus waxaanad ku lug-leedahay ganacsi ama xirfad, ay ku jirto guryo kirayn, ganacsigu ha khasaaro ama ha faa'iidee.

4. Waxaad deggantahay Columbus isla markaana magaalada aad ka shaqayso canshuurta aad siiso ma le'eka sicirka canshuurta (2.5%) ee Columbus.

5. Ma aanad ahayn qof deggan hase ahaatee waxaad Columbus dhexdeeda ku lug lahayd ganacsi xirfad ganacsigu ha faa'iido ama khasaaree.

## Si wadajir ah ma u xarayn karnaa canshuur celinta?

Lammaanaha is qaba way wada xarayn karaan canshuur celinta noocuu doonanba ha isticmaaleen xaraynta canshuur celintooda dowladda dhexe. Xaraynta wadajirka ah waxaa waajib ah inay labada lammanaba saxiixaan ay soo raaciyaan lanbarradooda aqoonsiga badbaadada bulshada.

## Ma isticmaali karaa Foomka IR-25?

Waad isticmaali kartaa foomka IR-25 haddii aad tahay shaqsi ay tahay inuu canshuur ka bixiyo Columbus. Shirkadaha oo ay ku jirto Shirkadaha- S), Iskaashatooyinka, isu-tagyada ganacsi, iyo agaasimayaasha dhaqaalaha ee maamula (hantida iyo dhaxalka) waxaa waajib ah inay xareeyaan canshuurta iyagoo isticmaalaya foomka BR-25.

## Goorma iyo xaggee ka Xareeyaa?

Canshuur celintan waxaa waajib ah in la xareeyo maalinta shan iyo tobnaad ee bisha afraad dhamaadka sanad canshuureedka. Marka la eego Kalandarka sanad canshuureedka, tani macnaheedu waxaa la sugayaa Abriil 15keeda.

Canshuur bixiye kasta oo codsada in loogu kordhiyo xaraynta canshuurta dowladda dhexe wuxuu isla markiiba canshuurta degmada uga helayaa wakhti taas la mid ah. Canshuur bixiyaasha aan helin ama ka codsan wakhti kordhin dowladda dhexe, waxay si gaar ah uga codsan karaan wakhti kordhin Waaxda Dakhliga Canshuuraha haddii codsigooda la helo ka hor wakhtigii canshuurta laga sugayey. Kordhinta wakhtiga lagu xaraynayo **ma'aha** wakhtiga ay tahay in canshuurta la biyo ama lagaa sugayey.

Haddii canshuur lagaa sugayey wakhti kororsiga aad codsatay kadib, waa in la isticmaalo foomka IR-42, Arjiga Wakhti Kordhinta Diiwaangelinta. Haddii aanad awoodin inaad bixiso canshuur lagugu lahaa, waa inaad wakhtigeedi Waaxda canshuuraha uga diiwaangelisaa sanad canshuureedka.

**Waxba Canshuur Bixin Ah Kuma Lifaaqna:**
Ku dir: Waaxda Canshuurta Dakhliga
PO Box 182437
Columbus, Ohio 43218-2437

**Bixintii Canshuurta ayaa Ku Lifaaqan:**
Su soo aaddi oo Sii: Qasnajiga Degmada
Ku dir: Waaxda Canshuurta Dakhliga Columbus
PO Box 182158
Columbus, Ohio 43218-2158

## Ka Warran haddii aan la daaho diiwaangelinta ama bixinta?

Columbus waxay saartaa ganaax iyo dulsaar canshuuraha rahman ee aan la bixinin kadib Abriil 15keeda. Sidaa awgeed, haddii aanad awoodin inaad si buuxda u wada bixiso canshuurta lagugu leeyahay, waa inaad weli xaraysaa oo aad bixisaa oo aad bixisaa inta aad awooddo sida ugu suurtagalsan.

## Ma waxaa jira xeerar gaar ah oo ku saabsan kharash soo celinta?

Kharash celinta iyo amaah aad leedahay oo aad dib ka sheegan karto oo ay keentay canshuur dheeraad ah oo hore u bixisay ayaa laga yaabaa in la codsan karo iyadoo la isticmaalayo foomka IR-25. Laga bilaabo sanad canshuureedka 2018, xeerka 2106 ee kharashaadka ganacsiga lagama jaran karo canshuurta degmada.

- Kharash celinta la dalbadaa waa inay ka badan tahay $10.00 ama lama bixin doono.
- Waxaa jira seddex (3) sanadood uu sharcigu ku xaddiday in la sheegto kharash celin ama amaah canshuur dheeraad ah oo aad hore degmada siisay.
- **Canshuurta ku soo dir:** Columbus Income Tax Division
  PO Box 182437
  Columbus, Ohio 43218-2437

## Waa maxay dakhliga la canshuuro?

**Dakhliga la canshuuro ee dadka degmada deggan.** Dakhliga la canshuuro waxaa ku jira dhammaan mushaar, lacag maaleed, iyo mag-dhaw shaqo/xaquuq, ka hor intaan laga goynin wax kharash ah sida 401(k) iyadoo aanay ku xirnayn halka lagu kasbaday. Dakhliga waa in la canshuuraa xitaa haddii lacag caddaan lagu bixiyey, hanti ama qaab kale tixgelineed kugu soo galay, waxaana kamid ah cuntooyin qiimo macquul ah ku fadhiya, hoteel seexasho iyo wixii la mid ah. Sidoo kale, dakhliga la canshuuro waxaa ku jira ganacsi gaar loo leeyahay sida guryo iyo qalab la kireeyo, mid gaar loo leeyahay, maamulid hanti, saammi uu qofka degmada deggan shirkad ku leeyhay (hala qaybiyo ama yaan la qaybsanine). Daklhiga shaqada uu khasaara oo dib loo sheegto ee xaddidan waa la oggolyahay sanad canshuureedka 2018 sida uu qabo xeerkake ORC 718.01.

Faa'iidada ganacsiyadan gaarka loo leeyahay waa in la canshuuraa, kumna xirna halka shaqada ganacsiga laga qabtay. Waxaa laga yaabaa inaad xaq u leedahay amaah/xaq canshuurta aad ku bixisay degmada halka dakhliga laga kasbaday. Haddii aad shuraako kamid tahay, waxaa laga yaabaa inaad xaq u leedahay celin/amaah canshuurta ay shirkadda degmada siisay. Tani waaa loo oggolaado oo kaliya marka la eego heerka qiimeynta canshuurta ee degmada sida uu qabo xeerka Degmada Columbus qodabka 362.081.

**Dakhliga la canshuuro ee dadka aan degmada degganayn.** Dakhliga la canshuuro waxaa ku jiro dhammaan mushaaraadka, saammi qof shaqo uu qabtay loo siiyo iyo magdhaw kale, ka hor intaan waxba laga goynin sida 401(k) shaqo laga kasbaday Columbus dhexdeeda. Dakhliga la canshuuro waxaa kale oo ku jira faa'iidada laga helo ganacsi gaar loo leeyahay sida guryo, qalab kiro, hanti gaar loo leeyahay iyo maamulkeeda haddii shaqada ganacsiga Columbus lagu dhex qabtay.

Go'aaminta faa'iidada ganacsiga gaarka loo leeyahay marka la tixraaco hannaanka xisaabinta loo isticmaalo ujeeddooyinka canshuurta dakhliga dowladda dhexe. Kharashaad kasta oo la sheegto waa waajib inuu noqdaa mid caadi ah oo lagama maarmaana ah. Laga bilaabo sanad canshuureedka 2018, khasaaraha hawlgalka ganacsiga ee dib laga sheegan karo ee xaddidan waa la oggolyahay sida uu qabo xeerka ORC 718.01. "Khasaaraha hawlgalka" macnaheedu waa khasaaro soo gaary qof ka shaqaynayey ganacsi ama beec-mushtar. "Khasaaraha Hawlgalka" kuma jirto khasaare aan la isticmaalin, khasaaraha ka dhasha arrimo xaddidan, xirfado aan fir-fircoonayn oo xaddidan. Xirfado aan firfircoonayn waxaa laga jarta sanadka la oggolyahay canshuurta dakhliga ee dowladda dhexe.

Haddii aad ku lug leedahay lago ama wax ka badan oo ganacsiyaal gaar loo leeyahay oo Columbus ka dhax shaqeeya, khasaaraha mid kamid ah ganacsiyada gaarka loo leeyahay ayaa laga yaabaa inaad u isticmaali karto faa'iidooyinka ganacsiga kale si aad u hesho xisaab miisaaman oo ku aaddan wadar guud oo miisaaman oo ka timid ganacsiyada oo dhan. Laga bilaabo sanad canshuureedka 2016, dakhliga ganasiyada ay mulkiilayaashoodu canshuurta mas'uulka ka yihiin ma'aha in canshuurtooda shaqsiga aan degmada degganayn ka muuqdo canshuur sanadeedka 2016 sida uu qabo xeerka Ohio ee dib loo saxay 718.01(B)(1)(d).

Dakhliga la canshuuro ee degmada kuma jirto kharashka laga helo caymis haddii shaqaaluhu bixiyi dhammaan khidmadaha caymiska. Dakhliga la canshuuro ee degmada sidoo kale kuma jirto kharash ka soo galay magdhaw dhaawac qof soo gaaray ama hanti haxyeelo soo gaadhay. Kharashaadka, qiimaha iyo khasaaraha la xariira dakhli aanay degmadu canshuurin looma isticmaali karo in lagu yareeyo canshuurta dakhliga ee degmada.

Eeg **Lifaaqa Hoose A** ee canshuurah ay tahay in la qaado "Dakhli kale" iyo dakhliga aan la canshuurin.

## Waa maxay ganacsi gaar loo leeyahay (Ganacsi aan magac qaanuuni kale wadan?

Ganacsiyadan hoose waa inay canshuurta ku diiwaangeliyaan foomka IR-25 halkii ay kaga diiwaangelin lahaayeen foomka BR-25:

a) Keli gaar u leh – Jadwalka C, Foomka dowladda dhexe ee1040
b) Hanti guryo kiro ah - Jadwalka E, Foomka dowladda dhexxe ee 1040
c) Iskaashato, midoow ganacsi iyo isutag nooc ganacsi (Ganacsiyadan waxay canshuurtooda ku xaryeeyaan foomka BR- 25; hase ahaatee, kuwa degmada deggan waxaa waajib ah inay saamiggooda dakhliga la canshuuro ku daraan kooda shaqsiyadeed haddii ay qayb-ka-yihiin iskaashi ganacsi).
d) Dakhli Beer - Jadwalka F, Foomka dowladda dhexe ee 1040.

## Canshuurta mushaarkayga maku yarayn karaa inagoo isticmaalaya khasaaraha ganacsi ee gaarka loo leeyahay?

Maya. Columbus ma oggola in khasaaraha ganacsi gaar loo leeyahay lagu yareeyo mushaarka, khidmado ama madhow.

---

## Buuxinta Foomka IR-25

1. Goobta loo cayimay geli magaca, cinwaankaaga guriga ee iminka, iyo nambarkaaga badbaadada bulshada. Haddii aad si wada jir ah ula diiwaangelinayso lammaane, fadlan qor magaca iyo nambarka badbaadada bulshada lammaanaha.

2. Haddii aad rajaynayso in lacag laguu soo celiyo sanadka aad canshuurta xaraynayso, "X" ku dhig sanduuqa dhanka midig ee sare ay ku qorantahay SOO CELIN. Cadadka lacagta soo celinta waa inay muuqataa Khadka 6B. Haddii aad saxayso sanad canshuureedka, ku dhig "X" sanduuqa ay ku qorantahay **SIXID** oo xaqiiji inaad goobta laguu qoondeeyey ku muujiso sanad canshuureedka aad saxayso. Haddii aad saxayso canshuur celinta degmada adigoo ku salaynayo sixid soo celin canshuureed oo aad ka diiwaangelisay I.R.S., waxaa <u>waajib</u> ah inaad soo raaciso nuqulka canshuurta dowladda dhexe ee aad saxday, oo ay ku jirto jadwalada khuseeya sixitaanka. Haddii aad xaraynayso sixid ku salaysan xisaab hubin/baaris ay I.R.S samaysay, waxaa waajib ah inaad soo raaciso waraaqo rasmi ah oo ku saabsan xisaab hubinta, kuna xus isbaddel kasta oo ay I.R.S samaysay si ay yarayso ama kordhiso dakhligaaga canshuureed.

3. Ku muuji xaaladdaada Canshuur diiwaangelineed.

4. Haddii aad codsanayso in koontadaada canshuureed la xayiro/joojiyo, ku muuji sababta (Canshuurta waxaa si buuxda u qaaday loo shaqeeye, ganacsigi ama hantidii kirada oo la iibshay. Iwm) kuna soo lifaaq waraaqo taageeraya sida foomka dowladda dhexe ee 1040, W-2P ama oraah ku saabsan kasbashada Badbaadada Bulshada.

5. Haddii aad guudhay, geli taariikhda guuritaankaaga iyo cinwaankaagi hore. Haddii aad dakhligaaga u

qoondaynayso sababo la xariira guuritaankaaga, waxaad u baahantahay inaad soo raaciso waraaqo sharxaya qoondaynta canshuur celintaada (sida nuqul ah jeegga dabadiisa oo ku taariikhaysan goor u dhaw taariikhda guuritaankaaga). Haddii aad codsanayso in kootadaada la joojiso/xayiro sababo la xariira inaad degmada ka guudhay oo aanad qorshaynin inaad ku soo noqoto, inkastoo aad weli cinwaan boosto ku leedahay degmada gudaheeda sida degmada kuugu diiwaan-gashan, fadlan soo raaci waraaqo khuseeya/ku saabsan guuritaankaaga.

6. Geli/qor shaqadaada. Haddii aad iskaa u shaqaysato, geli nooca ganacsigaaga iyo magaca bees-mushtarkaaga.

7. Geli/qor magacyada magaalooyinka aad ka shaqaysay. Haddii aad ka shaqaysay wax ka badan seddex (3) magaal, gadaal uga soo lifaaq diiwaanka magaalooyinka oo dhan.

8. Geli/qor magaalada (ama magaalooyinka) aad degganayd sanadka. Si aad u xaqiiqsato degganaanshaha fadlan wac (614) 645-7370.

## Qaybta A: Mushaaraadka la canshuuro

1. Ku muuqji cidda/qolada aad u shaqaysay iyo cinwaanadooda, waa halka aad dhab ahaan u shaqo tagtay (tani waxaa laga yaabaa inay ka duwantahay cinwaanka loo shaqeeyaha eek u qoran foomkaaga canshuurta ee W-2). Haddii arjigu ku filnayn, fadlan bog dheeraad ah ku soo lifaaq.

2. Lacagta ay tahay laguu soo celiyo ama dib u sixidda mushaaraadka la canshuuro, Soo buuxi qaybta D.

3. Muuji mushaarka magaaladu canshuurto ee goob shaqo oo walba.

**Ogow**

*Mushaaraadka canshuuraha degmada waxaa laga yaabaa inuu ka duwanaado kan dowladda dhexe ee Medicare ee lagu wariyey sanduuqa 5 ee foomkaaga W-2 sida dib u habayn loogu sammeeyey xeerka Ohio ee §718.03. Mushaaraadka la canshuura ee degmada waxaa ku jira mushaaraadka laga weeciyey ama laga daayey canshuurta gobalka iyo tan dowladda dhexe sida ku xusan qodabka §401 hay'adda dhexe ee dakhliga. Ka weecintani waxay ka muuqdaan sanduuqa 12 ee foomkaaga W-2 ee ku xusan qodabada D, E, F, G iyo S. Waxaa laga yaabaa inay kugu waajibto canshuuro dheeraad ah oo ay keento halka aad deggantahay haddii cidda aad u shaqayso aanay si habboon canshuurta kaaga qaadin ama si khalad ah canshuurta dakhligaaga u soo warisay.*

Haddii aad wax ka baddesho mid kamid ah mushaarkaaga ay tahay in la canshuuro, geli oo ku qor loo shaqeeyaha ku habboon hortiisa. Xaqiiji inaad ku soo lifaaqdo nuqulo haddii aad hayso caddaymo/waraaqo canshuurta dowladda dhexe ah oo kusheeya canshuurtaas iyo is-beddelaadda (diiwaanka maalmaha maqan, shahaado dhalasho, shatiga ama shatiga baabuur wadista.

## Qaybta D: Dib u habaynta/waxka badelidda mushaarka la canshuurto

**Faqradda 1: Ka da'a yar 18**
Waxaad yarayn kartaa mushaarka ay tahay in la canshuuro marka loo eego caddadka mushaaraad ee aad kasbatay inta aad ka da'a yartahay 18 sanadood. Si aad sidaas u yeesho, waxaa waajib ah inaad khadka 5 geliso taariikhda aad dhalatay, aadna ku soo lifaaqdo nuqul kamid ah shatigaaga baabuur wadista ama shahaado dhalasho. **Ha soo dirin nuqulada rasmiga ah (Originals)** — laguuma soo celin doono. Oraah la soo nootaayey oo qeexaysa dhalashadadaada oo ka timid waalidkaa ayaa baddel u noqon kara shatiga baabuur wadista ama shahaadada dhalashada.

**Faqradda 2: Canshuur si qaldan lagaaga qaaday**
Soo buuxi kuwan hoose oo kaliya haddii cidda aad u shaqayso si khalad ah canshuurta Columbus kaaga jaray. Tusaale qof aan magaalada degganayn oo:

1) Diyaaradaha uga gudbiya, baabuurta qaada, ama shaqaalo tareenada ah;
2) si joogta ah loogu xilsaaro waajibaadyo labo gobal ama ka badan; oo
3) canshuurti looga qaaday magaalo aan ahayn midda uu deggan-yahay.

Waxaa waajib ah inaad ku soo lifaaqdo W-2yada iyo waraaqo caddaymo ah. Ma meel marin karno canshuur celintaada ilaa markhaatiga loo shaqeeyaha la dhammaystiro.

**Faqradda 3: Si khaldan canshuur looga jaray lacag/kharash naafanimo**
Buuxi xariiqahan/khadadkan kaliya haddii cidda aad u shaqayso si khalad ah canshuur kaaga goysay mid kamid ah degmooyinka ay canshuurta Columbus u maamusha ee ku xusan bogga 1aad. Laga bilaabo 7/1/2007, lacagta naafanimada wakhtiga gaaban waa ka reeban-tahay in canshuur looga gooyo dowladaha hoose. Laga bilaabo 1/1/2004, lacagta naafanimada ee wakhtiga dheer waa ka reebantahay in laga gooyo canshuuraha dowladaha hoose. Waxaa waajib ah inaad caddayn ka keento cidda aad u shaqayso.

**Faqradda 4: Qofka aan degmada degganayn ee baabuurta waaweyn wada, dayuuradaha xamuulka ah ama tareenada u shaqeeya**
Isticmaal khadka/xariiqimaha haddii aad tahay shaqaale ee degmada degganayn uu shaqeeya mid kamid ah ganacsiyada oo uu waajibaadkaagu yahay **gudaha Ohio oo kaliya**. Shaqaalah aan degmada deggnayn ee sida joogtada ah loogu xilsaaro waajibaadyo labo gobal ama ka badan waa inay eegaan khadadka 4-6. Xaqiiji inuu caddayso/ka markhaati kaco cidda aad shaqayso.

**Farqadda 5: Qofka aad degmada degganyn ee maalmo shaqeeya**
Khadadka 13-21 waxay kuu tilmaamayaan hababka ku salaysan 260 maalmood oo shaqo sanadeed (Tani waxay matalaysaa shan (5) maalmood toddobaadkii oo lagu dhuftay 52 toddobaad). Maalmaha jirrada, fasaxa, iyo feestooyinka ee lacagta la qaato waa lagu daray/qiimeeyey habkan. Xaqiiji inaad ku soo lifaaqdo diiwaanka dhammaan taariikhaha aad ka shaqaysay goob Columbus ka baxsan, adigoo soo raacinaya goobaha (degmo iyo gobal) ee aad ka soo shaqaysay taariikhahaas. Sidoo kale, waxaa waajib ah in loo shaqeeyuhu soo buuxiyo caddaymo.

## Qaybta B: Xisaabinta Canshuurta

Ku soo wari/gudbi dhammaan dakhliga la canshuuro iyo canshuurta lagaa jaray khadka/xariiqa Columbus khuseeya.

Unugga B - Uguggan geli dhamman dakhliga mushaaraadka, gunnada iyo wixii kale ee aad magdhaw heshy. Eeg **Tusmada A** ee dakhliga la canshuuro “magdhaw kale” iyo dakhliga aan la canshuurin.

Unugga C - Geli dhammaan dakhliyada sida faa’iido aad ka heshy kirooyin iyo dakhliyada kale ee la canshuuro. Shaqiyaadka ku lugta leh ganacsiga ama saami ku leh shirkado waa inay buuxiyaan qaybaha C, E & F ka hor intaanay buuxin unugga C.

**Ogow** *Columbus ma oggola in khashaaro ganacsi gaar loo leeyahay lagu dheelli-tiro mushaaraadka, gunnooyinka ama magdhaw kale. Caddadka ku qoran unugga C KAMA yaraan karo eber.*

Unugga D - Unugga B lagu daray unugga C.

Unugga E - Isku dhufashada tirooyinka unugga D oo lagu dhuftay sicirka canshuurta Columbus.

Unugga F - **CADDADKA AMAAHDA WAXAY KU KU XADDIDANTAHAY CANSHUURTA 2.5%.**
Geli dhammaan kuwan soo socda, haddii ay jiraan:

1) canshuurta degmada ee laga jaray sida ka muuqataa foomkaaga W-2’s;
2) canshuurta sida saxda loogu bixiyey degmo kale oo dakhliga laga kasbaday (ku soo lifaaq nuqulka canshuur celinta ee aad ka xaraysay degmadaas); iyo
3) degmada canshuurta ay ku bixisay shirkad/shuraako ku matalaysa.

**Ogow** *HA KU qorin/gelin unuggan caddayn kharashka: waxaa lagu qoraa khadka/xariiqa 2 ee qaybta B. Ma sheegan kartid lacag canshuurta lagaaga dakhliga degmada eek a badan:*

1) *sicirka canshuurta degmadaas oo lagu dhuftay dakhliga ay tahay in la canshuuro shaqada degmadaas ku dhex taalo; ama*
2) *sicirka canshuurta Columbus ee ah (2.5%) oo lagu dhuftay dakhliga ay tahay in la canshuurta ee shaqadaas.*

Unugga G - Geli/qor wadarta saafiga ah ee canhuurta lagaa rabo(Unugga E yar Unugga F).

Xariiqda 1 - Geli wadarta canshuurta saafiga ah ee lagaa rabo (caddadka ka yimid unugga G).

Xariiqda 2 - Geli dhammaan caddaymaha bixinta la sammeeyey sanad canshuureedkan iyo canshuur bixin dheeraad ah oo ka timid sanadkii hore. Haku darin/ha gelin canshuur laga gooyey shirkad adigaa awgaa canshuur ku bixisay. (eeg unugga F).

Xariiqda 3 - Xariiqa 2 ka goo xariiqa 1 si aad u hesho canshuurta lagaa rabo oo saafi ah. Si kastaba ha ahaatee, haddii natiijado noqoto inaad canshuur dheeraad ah bixisay, ku muuji/calaamadee qaansooyin, una gudub xariiqa 5.

Xariiqda 4 - Geli/qor ganaaxa iyo dulsaarka, haddii uu jiro. Dhammaan canshuuraha aan la bixinin kadib bisha Abriil 15keeda, waxaa dul fuulaya 15% ganaax ah. Canshuurta weli rahman oo aan la bixinin kadib bisha Abriil 15keeda, waxaa dul fuulaya dulsaar bil walba oo dhan .583% iyo (7% sanadkiiba).

Xariiqda 5 - Xariiqa 3 oo lagu daray xariiqa 4 ku qor/geli wadarta guud caddadka laga sugayo. Haddii canshuurta lagugu leeyahay tahay $10.00 ama ka yar, kharash inaad bixiso khasab ma’aha.

Xariiqda 6 - Geli/qor canshuurta dheeraadka ah ee aad bixisay, haddii ay jirto; laga bilaabo xariiqa 3 waa tiro xaqiiq ah (Ha isticmaalin/haku calaamayn qaansooyin).

Xariiqda 6A - Geli/qor caddadka kharashka dheeraadka ah ee aad bixisay eek a yimid xariiqa 6 ee aad doonayso in

laguu tixgeliyo qiimeynta canshuurta sanadka danbe.

Xariiqda 6B - Geli/qor caddadka canshuurta dheeraadka ah ee aad bixisay ka timid xariiqa 6 ee aad doonayso in laguu cesho. Canshuur celinta waxaa waajib ah inay ka badan tahay $10.00. Waxaa waajib ah inaad saxiixda foomka canshuur celinta oo aad soo raaciso caddaymo si laguugu soo celiyo.

## Qaybta C: Dakhliga ka yimaado ilo ka duwan mushaar, gunno iwm.

Dakhliga la canshuurto ee ka yimaado faa'iido saafi ah waa in loo geliyaa/qoraa habkaan soo socda:

Unugga H - Geli/qor dakhliga saafiga ah (ama khasaaraha) ka yimid qaybta E, xariiqa 21 ama ka yimid jadwalka Y haddii aad qoondaynayso dakhligaaga. Haddii aad ku soo lifaaqday nuqul kamid ah jadwalka canshuurtaada dowladda dhexe ee C halkii aad ka buuxin lahayd qaybta E ee bogga 3aad, geli dakhligaaga ka yimid jadwalka C. Jadwalka Y waxaa loo isticmaalaa oo kaliya haddii aad ku lug lahayd ganacsi ka hawlgala wax ka badan hal degmo ah. Jadwalka Y waxaa xogtiisa lagu bixiyey waraaqa-hagan.

Unugga I - Geli/qor dakhliga saafiga ah (ama khasaaraha) ka yimid qaybta F, faqradda 1, Xariiqa 6, ama jadwalka canshuurtaada dowladda dhexe ee E haddii aad ku soo lifaaqday halkii aad ka buuxin lahayd jadwalka F. Xisaabin gooni ah ayaa loo baahan-yahay in loo isticmaalo marka la xisaabinayo faa'iidada saafiga ah ee aad kiro ka heshay ee ay tahay inay degmadu canshuurto. Kharashaadka hantida guryaha kirada ah ee guud ama la wadaago waa in si simman loogu qoondeeya dhammaan guryaha/hantida la kireeyey. Khasaaraha loogu daraa iyadoo la isticmaalayo xisaabin gooni ah.

Unugga J - Geli/qof saammigaaga dakhliga ay tahay inay degmadu canshuurto eek a yimid qaybta F, faqradda 2, ama jadwalka canshuurtaada dowladda dhexe ee E kaasoo ay waajib tahay in lagu soo lifaaqo foomka canshuur celinta. Khasaaraha ka yimid xirfado aan firfircoonayn ee ay tahay in dib laga sheegto lagama oggola qorshaha canshuureed ee degmada. Khasaaraha kharashka ganacsigu ku hawlgalayey ee dib laga sheegan karo ee 2018 waa la oggolyahay sida uu qabo xeeka ORC 718.01.

**Ogow**

**"KHASAARAHA KHARSHKA HAWLGALKA"** *macnaheedu waa khasaaro soo gaara qof ka hawl-galayey beec-mushtar ama ganacsi. "Khasaaraha hawlgalka" kuma jiraan khasaaro kaharsh aan la isticmaalin ee keeni kara xaddidaad, xaddidaado ganacsi halis ku jira, ama khasaaro xaddidan oo ka yimid hawl-gal ganacsi oo aan firfircoonayn.*

Unugga K - Geli/qor wadarta guud ee dakhliga (ama khasaaraha) ka yimid unuggayada H ilaa J. tirooyinka ku dar sida ka muuqata unugga K oo geli xariiqa canshuurta degmada sida ku habboon ee unugga C. Haddii khasaaro lagu muujiyey, unugga C geli eber.

## Qof/qolo Seddexaad oo u Xilsaaran

Haddii aad doonayso in aad saaxiib, qaraabo, ama qof kale u doorato si aad ugu oggolaato inuu canshuur celintaada degmada kala xaajoodo Columbus, fig sii sanduuqa "HAA" ee "qofka/qolada seddexaad ee u xilsaaran" qaybaha canshuur celintaada. Sidoo kale geli/qor magaca, teleefanka iyo numbarka badbaadada bulshada ee qofka u xilsaaran. Si kastaba ha ahaatee, haddii aad doonayso qofkii canshuurta kuu diyaariyey ee lacagta ku qaatay inuu degmada kala xaajoodo isaga/iyada oo uu ku matalayo, geli magaca canshuur diyaariyaha. Uma baahnid inaad geliso xogta kale ee la codsaday. Haddii aad fig siisay sanduuqa "HAA" in adiga iyo lammaanahaagu si wadajir ah u xaraynayaan, oo aad u idmaysaan in Degmada Columbus wacda u xilsaaranaha si uu uga jawaabo su'aalo kasta oo imaan kara inta la meel-marinayo canshuur celintaada. Waxaad kale oo aad u xilsaarnaha u idmaysaan inuu:

- Degmada Columbus siiyo xog kasta oo ka maqan canshuur celintaada,
- U soo waco Degmada Columbus xog ku saabsan meelmarinta canshuurtaada ama sugnaanta kharash celinta ama bixinta,
- Helo nuqulo wargelin ama qoraal la xariira canshuur celintaada, marka uu dalbadao, iyo
- Inuu ka soo jawaabo wargelino ka yimiaada Degmada Columbus oo ku saabsan khalad xisaabeed, sixid, iyo dib u celinta diyaarinta canshuurta.

**Uma** idmaysid u xilsaarnaha inuu helo jeegga lacag celinta, dusha kuu saaro hawl (ay ku jirto masuuliyad canshuur dheeraad ah), ama haddii kale kugu hor matalo Degmada Colummbus. Idamka oggolaanshaha wuxuu ahaanayaa mid ku dhaqan-gashan sanad canshuureedka cayiman ee ku xusan, haddii aan si qoraal ah isla sanad canshuureedkaas dib ooga noqon canshuur bixiyaha.

## Saxiix Foomka Canshuur Celintaada

Foomka IR-25 looma tixgelinayo mid dhammaystiran ilaa aad saxiixdo oo aad ku soo lifaaqdo dhammaan caddaymaha W-2 iyo waraaqaha rasmiga ah ee waafaqsan canshuurta dowladda dhexe. Haddii aad si wadajir ah ula xaraynayso lammaanahaaga, xaaskaaga/ninkaaga waa waajib inuu/inay sidoo kale saxiixo.

**Canshuur Diyaariyaasha Lacagta Ku Qaata Waa Waajib Inuu/Inay Soo Saxiixo.** Qof kasta oo aad lacag ku siiso inuu kuu buuxisyo diyaarinta canshuurta waa waajib inuu saxiixo, taariikhdana ku soo muujiyo booska loogu talagalay, waana inuu ku soo qoro Nambarka Aqoonsiga Canshuur Diyaaraha Lacagta Ku Qaata. (PTIN).

---

## Qaybta E: Jadwalka C – Dakhliga Ka Iskii-Shaqaysta-nimo

Su'aalaha ku qoran Qaybta E waa in si buuxda looga jawaabaa. Diwaangeli/tax dakhliga oo ka jar kharashaadka si aad u go'aamiso faa'iidada saafiga ah ama khasaaraha ka yimid ganacsiga ama xirfadda shaqo. Nuqul kamid canshuurta dowladda dhexe ee jadwalka C waa la aqbali doonaa baddelkii halkii aad ka buuxin lahayd Qaybta E ee foomka IR-25. *Dhammaan jadwalada iyo/ama foomamka taageeraya xogtaad qortay waa lagu soo lfiaaqaa canshuur celintaada.*

---

## Qaybta F: Dakhliga ka yimid Kiro ama Iskaashato

**Ogow**

*Tani ha soo gudbin faa'iidooyinka ama khasaaraha shirkadaha ay iskaashato isla leeyihiin sida (S corporation). Qayb-hoosaadka ee shirkada waa waaweyn ayaa ujeeddooyinka canshuuraha dowladda hoose loogu canshuurta shirkadaha waaweyn oo ay ku jirto (S corporation).*

**Faqradda 1: Dakhliga ama Khasaaraha Ka Yimid Kiro Hanti Guryeed**
Geli/qor dakhliga (khasaaro) ka yimid kiro guryo/dhul adigoo bixinaya xog faahfaahsan sida ku habboon unugyada loogu talagalay. Foomka dowladda dhexe ee 1040, jadwalka E waa in lagu soo wariyaa dhammaan diiwaanka hantida. Faa'iidada saafiga ah ka timid kirada guryaha waxay tahay in canshuurta looga qaado degmada ay ku yaalaan oo kaliya ama degmada uu deggan-yahay mulkiilaha helaya faa'iidada saafiga ah. Xisaabin gaar aha ayaa sidaas awgeed looga doonayaa faa'iidada ay tahay in degmadu canshuurto. Kharashaadka guud ama la wadaago ee guryaha kirada ah waa in si simman loogu qoondeeyaa dhammaan guryaha kirada ah. Haddii hantidu/guryuhu aanay ku oolin degmo wax canshuurta, dakhliga waxaa lagu canshuuraa degmada uu mulkiiluhu deggan-yahay.

**Faqradda 2: Dakhliga Iskaashatada**
Dadka deggan oo kaliya ayaa laga doonayaa inay soo wariyaan dakhliga Iskaashatada oo ay ku soo qoraan foomka IR-25. Caddadka ay tahay in la isticmaalo waa dakhliga saafiga ah ee ka yimid iskaashatada ee lagu gudbiyey canshuurta dowladda dhexe jadwalka E. Tixgelinta canshuurta la bixiyey wuxuu ku xaddidan-yahay caddadka laga doonayo degmada canshuur bixiyuhu degganyahay. Nuqulada jadwalada K-1 looma baahna in la soo gudbiyo, canshuur celintaada soo raaci nuqulka jadwalka E.

---

## Jadwalka Y – Habka Qoondeynta Ganacsiga

Soo gudbi foomka IR-25, oo lagu soo buuxiyey jadwalka Y, si qaab ku habboon loogu qoondeeyo canshuurta dakhliga ganacsi ka hawlgalay wax ka badan hal magaalo. Si loo meelmariyo iskudaba ridis/midayn iyo islahaanshaha xisaabinta faa'iidada saafiga ah, wuxuu qorshaha degmada Columbus yahay in si adag loo tarjumo Xeerka Ohio ee dib loo saxay ee §718.02. Laga bilaabo sanad canshuureedka 2004, isticmaalka xisaabinta koontada canshuureed ee faa'iidada saafiga ah, ma'aha door la sii isticmaali doono.

**Unugga A -** **Xariiqa a-** Qor/diiwaanka ku qor celcelista kharashkii hore ee hantida dhabta ah ee la taaban karo ee shaqsiyeed ama uu isticmaalay canshuur bixiyaha ee ku taalo gudaha degmada canshuur bixiyaha. Layn/xariiq kasta ka dar kiro sanadeedka guryaha/hantida la kireeyey u dhex taalo gudaha degmada oo lagu dhuftay 8.

**Xariiqa b-** U qaybi unugga A, xariiqa a, caddadka xariiqa/khadka 3. Haddii caddadka xariiqa 3 uu eber yahay, xariiqaas/khadkaas geli "n/a" "ma jirto".

**Unugga B -** **Xariiqa a-** Qor/diiwaanka ku qor wadarta laga helay iibka ama adeegyada lagu dhex sameeyey gudaha Columbus.

**Xariiqa b**- U qaybi Unugga B, xariiqa 4. Haddii caddadka 4 uu yahay eber, xariiqan/khadkan geli "n/a" "ma jiro".

**Unugga C -** **Xariiqa a-** Qor/diiwaangeli mushaaraadka iyo wixii magdhaw ah aad ku bixisay W-2 shaqaalo adeeg ku gudaha degmada, marka laga reebo magdhawyada ka reeban canshuurta dowladaha hoose sida uu qeexayo xeerka O.R.C. §718.11.

**Xariiqa b-** U qaybi Unugga C, xariiqa a, caddadka xariiqa/khadka 5. Haddii

caddadka Xariiqa/khadka 5 uu yahay eber, xariiqa/khadka ku qor/geli “n/a” “ma jirto”.

**Unugga D-** U qaybi wadarta xariiqa/khadka b unugyada A-C tirada ammuraha xisaabaha kala duwan ee aad isticmaashay.

**Tusaale 1**: Xariiqa/khadka 5 waxba mushaaraad ah ma muujinayo shirkadda oo dhan. Haddii xariiqa/khadka b ee Columbus muujiyo 30% 60% oo “ma jirto” ama maleh muujinayo unugyada A-C si kala duwan, waxaad u qaybinaysaa 90% (30% + 60%) loo qaybiyey 2 (maadaamaa labo unug oo kaliya ay tiro ku qornayd).

**Tusaale 2**: Xariiqa/khadka 5 waxay shirkadda oo dhan ku soo gudbisay mushaaraad. Waxba mushaaraadkan ah lagu kasban gudaha Columbus. Sidaas awgeed, haddii Xariiqa b ee Columbus muujiyo 30%, 60% iyo 0%, unugyada A-C si kala duwan, waxaad u qaybinaysaa 90% (30% + 0% +60%) oo loo qaybiyey 3 (maadaamaa seddexda unugba ay tiro lahaayeen… inkastoo tirada ku qoran unugga C ay ahayd eber).

**Unugga E-** Ku dhufashada caddadka ka muuqda foomka canshuurta (Tusaalaha jadwalka C, Jadwalka E, iwm.) lagu dhuftay boqolkiiba inta ka muuqata unugga D. Haddii caddadku yahay eber am aka yar, foomka IR-25 bogga 1aad, unugga H ee xariiqa ku habboon ee degmada geli eber. Haddii Unugga D uu leeyahay wax ka badan eber, caddadka geli xariiqa/khadka degmada ee ku habboon ee foomka IR-25, Unugga H.

## Xaraynta Foomamka IR-21 iyo IR-18

Canshuur bixiyaasha saadaalinaya in lagu leeyahay wax ka badan $200.00 canshuurta degmada ah waxaa waajib ah inay soo buuxiyaan foomka IR-21, soona qiraan/caddeeyaan Qiyaas/Qiimeynta Canshuurta. Dadka aan degmada degganayn oo leh dakhli ay tahay in Columbus lagu canshuuro waxaa iyagana waajib ku ah inay soo buuxiyaan foomka IR-21. Shaqiyaadka aan rajaynayn dakhli sanadka 2019 ay tahay in Columbus lagu canshuuro, waxaa waajib ku ah inay soo buuxiyaan foomka IR-21, kuna muujiyaan eber unugga G.

Foomka IR-21 waa la xareeyaa ugu danbayn bisha Abriil 15keeda. Bixinta canshuurta rubaca hore waa in lala soo gudbiyaa caddaynta. Wakthi kordhin canshuurta lagu xareeyo ama kharashka lagu bixiyo lama oggolaan doono.

Bixin canshuureed kasta oo ku xigta rubac kasta waa lagu soo gudbiyaa iyadoo la soo buuxinayo waraaqaha lacag bixinta ee foomka IR-18. Lacag bixintaada rubaca labaad, seddexaad iyo afraad waxaa la sugayaa 15ka bilaha Juun, Sebteembar, iyo Janaayo. Qiyaas canshuur bixineed kasta waxaa waajib ah inay muujiso dib u dhigista, oo ama la soo raaciyaa bixinta afar meelood meel (1/4) wadar qiyaaseedkii guud sida lagu muujiyey caddaynta. Si laguugu tixgeliyo inaad si daacadnimo ah u soo xaraysay, oo aan ganaax iyo dulsaar lagula beegsanin, canshuurta aad wakhtigeedi ku bixisay waa in aanay ka yaraanin 90% wadarta masuuliyadda canshuur celinta ku xusan foomkaaga dowladda dhexe. Waxaan kale oo aan tixgelin doonaa in qiimeynta canshuurta si daacadnimo loo soo xareeyey bixinta canshuurtaada ay la egtahay ama ka badantahay 100% sida ka muuqata canshuur celintaadi sanadkii hore. Ku guuldarraysiga in wakhtigeedi lagu bixiyo qiyaas canshuureedkii waxay keeni kartaa in lagugu dallaco ganaax iyo dulsaar.

Foomamka IR-21 iyo IR-18 iyo tilmaamahooda oo dhmmaystiran waxaa laga heli karaa shabakadda ***www.columbustax.net.***

Dib loo saxa. 11/04/2018

## Lifaaq/tusmada A
## La canshuuro "Mag-dhawyo Kale"

1. Gunnooyin.
2. Faa'iido/magdhaw lagu bixiyey hanti/guryo ama isticmaal qiimo suuq furan oo ilaa xad ay tahay in ay dowladda dhexe canshuurto sida lagu muujiyey foomka W-2.
3. Qaaraan/bixin lacageed uu shaqaale bixiyo ama isaga awgiis loogu bixiyo sanduuq hawlgabnimo ee u qalma sida qorshaha (401K iyo kii la mid ah) – la canshuuray sanadki dakhliga la kasbaday, weecin aan la idmin. Ka reebitaanada: Wax ku daridda qaaraanka loo shaqeeyaha lagu bixiyey hannaan qorshe oo aan la canshuurin. Qorshayaasha weecinta xitaa haddii ay leedahay hannaan qorshe markasta waa mid la canshuuro.
4. Qaaraanka/bixinta lacageed ee uu shaqaal bixiyo ama isaga awgiis lagu bixiyo sanduuq gaar ah oo leh caddad go'an ama sanduuq suuqa saami iibiska oo canshuurta laga weeciyey (oo ay ku jiraan qorshe shaqaaluhu ku helayaan door weecineed).
5. Qaaraan/bixinta lacageed uu sameeyo shaqaale ama isaga awgiis lagu sammeeyo qorshe magdhaw la weeciyey oo aan u qalmin canshuur dhaaf.
6. Qiimaha/kharashka caymis kooxeedka nolosha eek a badan $50,000.00 (illaa uu/ay qayb ka yahay hannaan qorshe).
7. Kharashka Agaasimaha.
8. Kharashka gargaarka ilmo/ubad aanad dhalin korinta (Illaa ay uu/ay qayb ka tahay hannaan qorshe).
9. Sicir dhimis shaqaale oo dheeraad ah.
10. Kharashka heshiiska madaxda sare marka ay shaqada laga eryo.
11. Dakhliga laga dammaanad qaaday heshiiska mushaarka sanadlaha ah.
12. Dakhli ka yimid adeeg xeer-beegti.
13. Dakhli ka yimid qorshe-yaal mushaar oo sii socday (waxaa ku jira qorshayaasha dhiirrigelinta hawlgabidda iyo iibsiga wakhtiga haray).
14. Dakhli lagu helay axdi ama heshiis la galay oo aan la dhammaystirin oo ku saabsan mushaarka shaqaalaha.
15. Dulsaar ka hooseeya sicirka deymaha suuqa.
16. Dibu ugu celinta kharashaadka guuritaanka (Raac qaanuunada dowladda dhexe, hase ahaatee kharashaadka aan la mag-dhabin lama sheegan karo).
17. Kharashaadka la qaybsado hawlgabka ka hore ee laga qaato qorshe hawlganimo (marka laga reebo dakhli hore loo canshuuray oo ka yimid qorshooyin la weeciyey).
18. Abaal marin, bilado iyo hadiyado- haddii ay la xariirin shaqo.
19. Fa'iido qaybsi.
20. Xaquuq lagu helay hal abuur ama mulki xirfad kale (ilaa laga helay xaquuq hal abuur oo xafidan, magac, ama shati lahaansho diiwaan-gashan)..
21. Faa'iido, madhaw xaquuq shaqo ka tagis.
22. Mushaar maalmo jirro iyo/ama fasax.
23. Gunno adeeg – haddii shaqadaada laga doonayo (dhaar ku marista saboolnimada lama aqoonsana).
24. Qorshooyinka gunnada iyo dhiirrigelinta suuqa saamiyada.
25. Noocyada saamiga.
26. Dheefta shaqojoojinta ee shaqadu bixiso.
27. Lacag dheeri ah oo shaqa la'aanta ay shaqadu ku bixiso.
28. Canshuurta ay shaqadu ka bixisay shaqaalaha.
29. Bakhshiishka.
30. Ujrada wakiilnimada ururka shaqaalaha
31. Dakhliga culumada sida ku cad Xeerka la Muraajaceeyay ee Ohio §718.01(R)(2)(e).
32. Faa'iidada Khamaarka. Khasaarada laguma bixin karo faa'iidada.
33. Abaalgud ama faa'iido bakhtiyaanasiibka.

## Dakhliga aan la canshuurin

1. Masruufka.
2. Kharash cayiman oo biil ahaan loo helo- wakhtiga bixinta.
3. Koradhka lafihii hore ee maalgelin.
4. Koradhka maalgashi weli suuqa ku jira.
5. Gunnooyinka kirada culumada ee ay oggoshahay IRS.
6. Xiroownimada/hawl wehlineed (Illaa shaqo/adeegyo laga doonayo).
7. Ku guulaysashada khamaarka wixii ka horreeyey 5/31/12.
8. Qoondayn kharash Dowlad bixisay.
9. Dakhli uu kasbaday qof ka da'a yar 18 sanadood.
10. Dakhli ka yimid barnaamijka taakulaynta awooweyaasha/ayeeyo korisa carruur dadkale dhaleen.
11. Dakhli macaahid diin, xariir walaaltinimo, hay'ad samafal, farbarasho, waxbsarasho, ama cilmi baaris ilaa xadka in dakhligaas uu ka yimid guryom, hanti la taaban karo ama aan la taaban karin; ama xirfado canshuurta laga daayey.
12. Faa'iidooyin laga helay caymid –illaa cidda aad u shaqayso ay bixisay kharashka caymiska. (Qiimeyn ayaa la oggolyahay haddii aad qayb ahaan bixisay kharashka caymiska).
13. Faa'iido dulsaar.
14. Kharashka naafanimo wakhti dheer leh oo la bixiyo kadib 1/1/04.
15. Cuntooyin iyo hoteelo laga doonayo goobaha shaqada.
16. Mushaarka Militariga ay mushaarka ciidamada kaydka ah.
17. Farac hoosaadka shirkadaha la isla leeyahay nooca (S corporation) ee aan degmada deggnayn faa'iidada uu helo saamilaha degmada deggan (laga bilaabo 1/1/03) ma'aha mid ay tahay in la canshuuro.
18. Dakhliga ka yimid xaquuq magac ganacsi ama summad diiwaangashan.
19. Dakhliga hawlgabka – waxaa ku jiro lacag si wadar buuxda loo qaato.
20. Bilado – illaa ay la xariirto Shaqo.
21. Xaquuq lagu helay hal abuur ama mulki xirfad kale – haddii laga helay hanti aan la taaban karin.
22. Mushaarka qof maskaxda naafo ka ah u shaqeeyo xarun ay dowladdu kharashkeeda bixiso oo ku

shaqeeya wax ka yar mushaarka ugu hooseeya ee degmada Columbus oo kaliya.

23. Kharashka naafanimada wakhtiga gaaban ee la bixiyo kadib 7/1/07.
24. Faa’iidooyinka Badbaadada Bulshada.
25. Faa’iidooyinka shaqo la’aanta gobalka.
26. Lacagta Caydha/samafalka
27. Magdhawga shaqaalaha (Kuwa waxyeelo soo gaadho)
28. Dakhliga ka yimaada adeegga hawlaha doorashada deegaan hoosaadyada ee ka yar $1,000.
29. Dakhliga ka yimaada shirkadaha baabuurta/gaadiidka ay lagu maamulo sharuucda PUCO, oo ay ku jirto jadwalka C ee dakhliga baabuurta.

**Ogow**

*Tani waxaa loogu talagalay ujeeddooyin tixraac oo kaliya. Waxaa laga yaabaa in aanay weliba ku qornayn, ogeysiis la’aan ayaana la cusboonaysiin karaa.*